

HENNEPIN COUNTY
ELECTIONS

Hagaha
Codbixiyaha



Soo dhawoow

Kooxda Hennepin County Elections waxay ku dadaalaan inay kuugu adeegaan daacadnimo iyo saxnaan. Markaad codayso, waxaad dhiibatay ra'yigaaga, waxaad la xisaabtantaa madaxda la doortay, waxaadna saamaynaysaa arrimaha muhiimka ah ee saameeya bulshadaada.

Hagaha codbixiyaha wuxuu sharxayaa hanaanka cod bixinta wuxuuna ku siinayaa agabyo aad ku noqoto codbixiye aad xog ogaal u ah. Fadlan kala xidhiidh xafiiskeena wixii su'aalo ah oo aad qabtid.

Waad ku mahadsan tahay ka qayb qaadashada dimuqraadiyadeena!

Si daacadnimo leh,

Ginny Gelms
Agaasimaha Waaxda Doorashooyinka

Shaxda Tasmada

Cida codeyn karta.....	4
Xuquuqda codbixiyaha	5
Liiska hubinta wayaabaha muhiimka ah waqtiga cod bixinta..	6
Isku diwaangelinta codbixinta.....	7
Siyaabaha laysku diiwaan geliyo	8
Marag noqosho	9
Siyaabaha loo codeeyo	10
Si fudud u isticmaalida.....	14
Duruufo gaar ah.....	15
Xafisyada la doortay.....	16
Waxa ku qoran warqaddaada codbixinta.....	19
Ahaanshaha codbixiye xog ogaal ah	20
Calaamadaynta warqadaada codbixinta.....	21
Ka qaybqaado	23



Cida codeyn karta

Waxaad ka codayn kartaa Minnesota haddii aad buuxiso dhammaan shuruudaha soo socda:

- Muwaadin Maraykan ah
- Ugu yaraan 18 jir Maalinta Doorashada
- Qof deggan Minnesota muddo dhan 20 maalmood
- Aan hadda loo xidhin wax xukun culus ah
- Garsooruhu kaalamuuna noqon xaqaqa aad u leedahay inaad codayso iyadoo lagu ilaalinayo



Xuquuqaha Codbixiyaha

Waxaad leedahay xuquuq badan codbixiye Minnesota ahaan! Xusuusnow, laguuma diidi karo xaqa aad u leedahay inaad cod bixiso haddii aad u qalanto.

Waxaad xaq u leedahay inaad:

- Caawimo codsato
- Caawimo ka hesho garsooraha doorashada ama aad keento qof ku caawiya
- Codayso marka aadan xabsiga ugu sii jirin xukun culus
- Shaqada fasaxa ka qaadato si aad u codayso adoon lumin mushaharkaaga, fasaxaaga shakhsi ahaaneed ama wakhtiga fasaxa
- Keento muunad warqad codbixin ah goobtaada codbixinta
- Hesho warqadda codaynta beddelka ah haddii aad khalad ku samayso warqaddaada ka hor inta aadan codaynin
- Codayso haddii aad safka ku jirto 8 p.m. Maalinta Doorashada
- Keento carruurtaada goobtada doorashada



Liiska hubinta wayaabaha muhiimka ah waqtiga cod bixinta



Codbixintu waxay u ekaan kartaa mid leh cabsi marka hore, laakiin waxaan halkan u joognaa inaan kaa caawino hanaanka.

Isticmaal liiskan hubinta iyo hagaha codbixiyaha si aad si fudud ugu codayso sanadkan!

Isku diyaari inaad cod bixiso

- Hubi inaad u qalanto inaad cod bixiso (*bogga 4*)
- Isdiwaangeli si aad u codayso (*bogga 7*)
- Ogow waxa ku qoran warqaddaada codbixinta (*bogga 19*)
- Lahow qorshe aad ku codayso:
 - Waxaan ku codeyn doonaa boostada (*bogga 11*)
 - AMA**
 - Waxaan ku codeyn doonaa qof ahaan (*bogga 12*)
 - AMA**
 - Waxaan codeyn doonaa Maalinta Doorashada (*bogga 13*)
- Codeel!



Isku diwaangelinta codbixinta

Waa inaad isdiiwaangelisaa ka hor inta aanad codayn.

Isdiiwaangelintu waa hab lagu caddeeyo inaad u qalanto.

- Gobolka Minnesota, waxa aad hore isku diwaangelin kartaa ilaa 21 maalmood ka hor Maalinta Doorashada.
- Waxaa kale oo aad iska diiwaan gelin kartaa marka aad goor hore qof ahaan u codayso ama Maalinta Doorashada iyadoo isla maalintaas aad isdiiwaan gelisay

Ma hubtaa inaad is diiwaangelisay? Ka hubi barta mnvotes.gov/register



Siyaabaha laysku diwaangeliyo

Onlayn barta mnvotes.gov/register

- Waxaad u baahan doontaa ciwaan iimayl ah haddii aad isticmaasho qaabkan

Warqad

- Ka daabaco foomka codsiga diiwaangelinta mnvotes.gov/register ama hennepin.us/elections
- Boostada ugu dir ama u gee Hennepin County Elections

Qof ahaan

- Waxaad u baahan tahay inaad keento caddaynta
 - cida aad tahay, iyo
 - halka aad ku nooshahay

Tusaale, aqoonsiga ama laysinka darawalnimada Minnesota waqti xaadirkan oona shaqaynaya
- Ka hel liiska dhammaan xulashooyinka caddaynta degenaanshaha barta mnvotes.gov/register

AMA

- Hayso cod-bixiye ka diiwaan gashan xaafadaada oo marag kuu noqdo (*wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan maragta ka fiiri bogga 9*)

Xusuusnow inaad cusboonaysiiso diiwaangelintaada markaad:

- U gurto ciwaan cusub
- Beddesho magacaaga
- Aadan codaynin ugu yaraan hal mar afartii sano ee la soo dhaafay



Ardayda kuleejka

Isku diwaangeli ciwaanka aad hadda aaminsan tahay inuu kuu yahay guriga. Tusaale, qolka aad ka jiifato kuleejka, guri ka baxsan kambaaska, ama guriga waalidkaa.



Marag noqosho



Haddii aadan u haysanin wax dukumeenti sax ah deganaanshahaaga hadda, waxaad heli kartaa qof marag ah markaad qof ahaan u codaynayso..

Qofka maragta kuu ah waxa looga baahan yahay inuu saxiixo dhaar xaqiijinaysa ciwaankaga.

Yaa marag kuu noqon kara?

- Cod-bixiye diwaangashan oona kugula nool xaafadda
(*Cod-bixiyuhu wuxuu marag u noqon karaa ilaa siddeed codbixiye*)

AMA

- Xubin ka tirsan shaqaalaha xarunta haddii aad ku nooshahay xarun la dego
- Shaqaaluhu waxay u baahan yihiin inay ku soo bandhigaan caddaynta shaqadooda goobta codbixinta (*tusaale: baajka aqoonsiga shaqaalaha ama liiska shaqaalaha*)

Ma laha wax xaddidaad ah inta qof ee xubin shaqaale ah marag u noqon karta.

Cid kale marag uma noqon kartid haddii qof marag kaa noqday.

Ogsoonow: Haddii ciwaankaaga aan la xaqiijin karin, waxaa laga yaabaa in “su’aalo lagugu waydiiyo” goobaha codbixinta. Weli waad awoodaa inaad codeyso. Garsoorayaasha doorashada goobtaada codbixinta ayaa ku marin doona dhaarta xaq u yeelashada ka hor codbixinta.



Siyaabaha loo codeeyo

Minnesota gudaheeda, waxaad leedahay ikhtiyaaro sidaan u dooran lahayd inaad codayso.

Dhammaan codbixiyayaashu way u qalmaan inay sidaan sameeyaan.

Inay goor hore ku codeeyaan boostada (*bogga 11*)

AMA

Inay goor hore ku codeeyaan qof ahaan (*bogga 12*)

AMA

Inay codeeyaan Maalinta Doorashada (*bogga 13*)



Goor hore ku codee boostada

Ku codaynta boostada waa mid sahlan oona haboon. Uma baahnid inaad ka baxdo guriga mana jiro leen sugitaan ah!


Tallaabooyinka:

1. Isdiwaangeli si aad u codeyso (*bogga 7*)
2. Ka codso in boostada laguugu soo diro warqadda codbixinta maqnaanshaha barta mnvotes.gov/absentee ama hennepin.us/elections
 - Ogsoonow: Sannadaha doorashada oodhka codsiyada maqnaanshaha waxay u baahan yihiin in loogu soo diro Hennepin County Elections boostada, iimaylka ama fakiska.
3. Waxaad ku heli doontaa warqadaada codbixinta boostada
4. Buuxi warqadaada codbixinta
 - Hubi inaad si taxadar leh u akhrido tilmaamaha
 - Saxiix markhaati ayaa looga baahan yahay cod-bixiye ama nootaayo diiwaangashan
 - Waxaad heli doontaa foom diiwaangelin dheeraad ah si aad u buuxiso haddii aadan horaan isku diwaangelinin
5. Ku soo celi warqaddaada codbixinta boostada ama qof ahaan
 - Warqadaada codbixintaadu waa inay timaadaa 8 p.m Maalinta Doorashada


Waxaad ka raadraaci kartaa warqadaada codbixinta barta mnvotes.gov/track

Haddii aad qabto wax arrimo ah ka qabtid warqaddaada codbixinta, kala xiriir Hennepin County Elections 612-348-5151 ama hc.vote@hennepin.us

Buuxi warqada codbixinta



Qaababka loo soo celin karo warqada codbixinta






Goor hore qof ahaan

Waxaad ka codayn kartaa xafiiska doorashada deegaankaaga ama goobta codaynta goorta hore ilaa 46 maalmood ka hor Maalinta Doorashada.

Tallaabooyinka:

1. Goor hore isdiiwaangeli ama isdiiwaangeli markaad codaynayso (*bogga 7*)
 - Haddii aad goor hore isdiiwaangelisay, uma baahnid inaad la imaato aqoonsi
 - Haddii aad isdiiwaangelinayso Maalinta Doorashada, iska hubi inaad la imaatid caddaynta deganaanshaha saxda ah
2. Ka ogoow goobtaada codbixinta iyo saacadah la shaqeeyo barta hennepin.us/elections
 - Xususnoow in waqtiyada la sugayo ay kala duwanaan karaan
3. Waxaad buuxin doontaa arjiga codbixinta maqnaanshaha ka hor inta aadan helin warqadda cod bixinta
4. Codeel!
 - Waxaad ka codayn doontaa meel gaar ah
 - Waxaad xaq u leedahay inaad caawimo codsato ama aad hesho warqad codbixin cusub haddii aad wax khaladid







Maalinta Doorashada


Maalinta Doorashadu waa wakhti xiiso leh in la codeeyo, goobtaada codbixintuna badanaa waxay u dhowdahay guriga.

Tallaabooyinka:

1. Goor hore isdiiwaangeli ama isdiiwaangeli markaad codaynayso (*bogga 7*)
 - Haddii aad goor hore isdiwaangelisay, uma baahnid inaad la imaato aqoonsi
 - Haddii aad isdiiwaangelinayso Maalinta Doorashada, iska hubi inaad la imaatid caddaynta deganaanshaha saxda ah
2. Ka ogoow goobtaada codbixinta barta mnvotes.gov/pollfinder
 - Xasuusnoow in waqtiyada la sugayo ay kala duwanaan karaan
 - Codbixintu waxay furan tahay 7 a.m. ilaa 8 p.m. Maalinta Doorashada
3. Codeynta!
 - Waxaad ka codayn doontaa meel gaar ah
 - Waxaad xaq u leedahay inaad caawimo codsato ama aad hesho warqad codbixin cusub haddii aad wax khaladid

Haddii aad safka ku jirtid 8 p.m., waxaa lagu oggolaan doonaa inaad codayso.





Si fudud u isticmaalida



Goobaha codbixinta ayaa loo baahan yahay in si fudud loo isticmaali karo.

- Codbixiyuhu wuxuu keeni karaa saaxiib, xubin qoyska ah, ama qof kasta si uu uga caawiyo inay codeeyaan.
- Codbixiyuhu wuxuu kaloo caawin ka codsan karaa garsooraha doorashada.

Teknolojiyada codbixinta ee la heli karo

Goob kasta oo codbixineed waxay leedahay tablet-ka OmniBallot (aalada calaamadaynta cod bixinta ay sida fudud u isticmaali karaan) codbixiyayaasha naafada ah, taasoo u oggolaanaysa qof kasta inuu u calaamadeeyo codkiisa si madax-bannaan iyo si gaar ah isagoon isticmaalin qalin.

Mashiinku waxa uu leeyahay shaashad ku muujinaysa warqadda codbixinta far waaweyn ama muuqaal hoosaad qoraalkiisa sarreeya. Waxa kale oo ay kuugu akhrin kartaa warqadda codbixinta iyada oo la isticmaala samiicada madax gashiga.

Codbixiyayaashu waxay ku calaamadayn karaan doorashadooda shaashada taabashada, keyboorka indhoolaha, ama aalad leh saddex-badhan.

Gaariga ku dhax codeynta

Garsoorayaasha doorashada ayaa kaa caawin kara inaad gaadhiga ku dhax codeyso haddii aadan si sahlan uga dagi karin gaarigaaga. Laba garsoore doorasho ayaa kuu keeni doona agab u baahan saxiix iyo warqadaada codbixinta. Marka aad dhammayso calaamadaynta warqadaada codbixinta, waxay lu keenayaan warqadda codbixinta oo ku jirta gudaha sanduuqa codbixinta.

Duruufo gaar ah

Codaynta iyadoo aad tahay guri la'aan

Haddii aad xaq u leedahay inaad codayso, waad samayn kartaa iyada oo aan loo eegin xaaladdaada guri. Hubi inaad isticmaashid ciwaanka aad degan tahay hadda (*tusaale, hoyga, guriga saaxiibka, bannaanka, iwm.*) markaad isdiiwaangelinayso.

Ciwaanka bannaanka ah, ku qor jidadka isgoosyada adigoo sharraxaya meesha aad seexato (*tusaale, SW corner of Loring Park near the intersection of Hennepin Ave. and Oak Grove St.*).

Haddii aadan haysan dukumeenti sax ah oo ku saabsan deganaanshahaaga hadda, waxaad heli kartaa qof marag kuu noqda Maalinta Doorashada. Qofka maragta kuu noqonaya waa inuu ku nool yahay dariskaaga waxaana laga rabaa inuu ku dhaarto inay shakhsi ahaan og yihiin inaad ku nooshahay goobta aad bixisay (*bogga 9*).

Codeynta adigoo leh diiwaan dambi

Diiwaanka dembigaagu ma saamaynayo xaqqa aad u leedahay inaad ka codayso Minnesota ilaa aad hadda u xidhan tahay xukun dembi culus mooyee. Marka lagaa soo daayo xabsiga, xaqqa aad u leedahay inaad cod bixiso waa la soo celinayaa.

Safe at Home

Safe at Home waa barnaamij gobolka oo dhan ka jira si loogu caawiyoo dadka u baqaya ammaankooda inay ka dhigaan ciwaan sir.

Haddii aad tahay qof qayb ka ah barnaamijka Safe at Home, fadlan booqo websaydka barnaamijka Safe at Home si aad wax badan uga ogaato sida loo codeeyo. Waxaad sidoo kale wici kartaa lambarka Safe at Home: 1-866-723-3035.



Xafisyada Federaalka

Madaxweyne: Madaxa Maraykanka. Waxay saxiixaan biilasha sharciga uu ansixiyo Koongareeska Maraykanka, ama biilasha diidmada qayaxan. Madaxweynaha ayaa mas'uul ka ah fulinta iyo fulinta sharciyada uu abuuray Koongareeska. Waxay magacaabaan madaxda in ka badan 50 guddiyo federaal ah oo madax banaan waxayna soo saari karaan amar fulineed. Waxay magacaabaan madaxda in ka badan 50 guddiyo federaal ah oo madax banaan waxayna soo saari karaan amar fulineed. Madaxweynaha ayaa magacaabaya Garsoorayaasha Maxkamadda Sare si uu u ansixiyo Koongareeska. Madaxweynuhu waa taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida ee Maraykanka. Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa ayaa xilka haya muddo afar sano ah, waxayna ku eg yihiin laba teeram. *Xisbi*

Madaxweyne ku xigeenka: Masuuliyadda koowaad ee madaxweyne ku xigeenka waa inuu diyaar u yahay inuu qabto xilka madaxtinimo haddii madaxweynuhu uu awoodi waayo inuu waajibaadkiisa guto. Madaxweyne ku xigeenku waxa uu u adeegaa sidii madaxweynaha Xildhibaanada Maraykanka oo waxa uu u codeeyaa go'aaminta kiiska barbar dhaca. They formally preside over the receiving and counting of electoral ballots cast in presidential elections. Waxay si rasmi ah u maamulaan qaabilaadda iyo tirinta codadka doorashada ee doorashada madaxweynaha. Madaxweyne ku xigeenku wuxuu ku tartamaa isla tigidhkii madaxweynaha, markaa waxaad iyaga ugu codayn doontaa lammaane ahaan. *Xisbi*

Xildhibaanada Maraykanka: Xildhibaanada waa hal aqal ee Koongareeska. Waxaa jira 100 xildhibaan oo Maraykan ah, laba ka socda gobol kasta. Xildhibaanada Mareykanka ayaa soo jeedinaya sharciga, ka doodaya, una codeynaya. Waxay kormeer ku leeyihiin miisaaniyadda federaalka, waxay ogolaadaan ama diidaan magacaabista madaxweynaha. Golaha xildhibaanadu waxa uu leeyahay awood uu ku ogolaado ama ku diido heshiisyada lala galo dawlado shisheeye cod saddex meelood laba meel. Waxay u adeegaan muddo lix sano ah. *Xisbi*

Wakiilka Maraykanka: Golaha Wakiilada waa aqalka labaad ee koongareeska. 435-ta wakiil ee Maraykanka waxa loo qaybiyaa dad ahaan waxaana dib loo qaybiyaa tobankii sanoba mar marka la tirakoobo. Sida xildhibaanada Mareykanka, wakiiladu waxay soo jeediyaan, ka doodaan, oo una codeeyaan sharciga waxayna awood u leeyihiin inay xilka ka qaadaan mas'uuliyiinta federaalka. Waxay u adeegaan muddo labo sano ah. *Xisbi*

Xafisyada Gobalka

Badhasaab: Madaxa fulinta gobolka. Waxay magacaabaan madaxda waaxyaha iyo wakaaladaha, waxay soo jeediyaan miisaaniyada gobolka waxayna

saxiixaan (ansixiyaan) ama diidaan (kahor imaadaan) sharciga. Waxay sidoo kale magacaabaan garsoorayaal buuxiya boosaska bannaan oo soo saari kara cafis iyo joojin, waxayna soo celin karaan xuquuqaha dadka gakaiy dembiilayaasha waaweyn. *Xisbi*

Badhasaab ku xigeen: Wuxuu u qaataa mas'uuliyadda badhasaabka marka uu maqan yahay ama haddii ay jirto boos bannaan. Waxa kale oo ay qabtaan hawlo kale oo uu barasaabku u xilsaaray. Badhasaab ku xigeenku wuxuu ku tartamaa tigidh la mid ah kan badhasaabka, markaa waxaad iyaga ugu codayn doontaa laba ahaan. *Xisbi*

Xoghayaha Gobalka: Wuxuu u shaqeeyaa sidii madaxa doorashada wuxuuna kormeeraa dejinta sharciyada doorashada iyo tababarida shaqaalaha doorashada degmada. Waxay kaloo cadeeyaan dukumentiyada rasmiga ah ee gobolka waxayna diiwaangeliyaan ganacsiyada iyo ururada aan macaash doonka ahayn. Intaa waxaa dheer, waxay maamulaan barnaamijka Safe at Home. *Xisbi*

Hanti dhawraha Gobalka: Wuxuu kormeeraa lacagaha ay kharash gareeyaan dawladda hoose wuxuuna fuliyaa hubinta xisaab xidhkooda. *Xisbi*

Xeer ilaaliyaha guud: Waxuu siiyaa adeegyo sharci dawladda gobolka, waxuu ku matalaa gobolka kiisaska maxkamadaha, waxuu fuliyaa sharciyada khuseeya hay'adaha samafalka wuxuuna ilaaliyaa xuquuqda dadweynaha. *Xisbi*

Xildhibaanaka gobalka: Xildhibaanaka gobolku waa "aqolka sare" ee laanta sharci dejinta ee gobolka. Xildhibaanada ayaa sharci soo jeediya, ka doodaya una codeeya. Waxay ka qayb qaataan hanaanka miisaaniyada gobolka. *Xisbi*

Wakiilka gobolka: Aqalka dawladu waa "aqolka hoose" ee laanta sharci dejinta gobolka. Wakiiladu waxay soo jeediyaan sharci, way ka doodaan, wayna u codeeyaan. Waxay ka qaybqaataan hanaanka miisaaniyada gobolka. *Xisbi*

Xafisiyada degmada

Guddoomiyaha degmada: Wuxuu ansixiyaa miisaaniyad sanadeedka degmada, go'aaminaaya canshuuraha degmada, wuxuu magacaabaa maamulaha degmada wuxuuna oggolaadaa sharciyada shaqaalaha. Waxay sidoo kale ka shaqeeyaan qorsheynta muddada fog iyo hagaajinta raasamaalka, oggolaadaan isticmaalka deeqaha gobolka iyo federaalka, qaataa sharciyada degmada wuxuuna buuxiya boosaska ka banaan qareenka degmada iyo nabadoonka. *Aan xisbi ahayn*

Nabadoonka degmada: Wuxuu fuliyaa dhammaan habraacyada, qoraallada, xeerarka, iyo amarada ay soo saarto ama ay samayso maamulka sharciga ah. Nabadoonka gobalka ayaa baaraa shilalka baabuurta madadaalada ee keena dhaawac shakhsi ama dhimasho oo ka dhaca meel ka baxsan xuddudaha degmada. Waxay ku adeegaan dhammaan waraaqaha, soo dhajiyaan dhammaan ogeysiisyada sharcigu la sheegay in loo adeego ama lasoo dhajiyo iyagoo

matalaya gobolka ama degmada, waxayna sii wadaan xukunka iyo gacan ku haynta xabsiga degmada. *Aan xisbi ahayn*

Qareenka degmada: Waxay siisaa adeegyo sharci ag gobolka. Waxay fuliyaan dembiyada culus iyo dhammaan kiisaska ku lugta leh dembiilayaasha dhallinta, waxay kormeeraan barnaamijyada kula xisaabtanka dhallinta ficiladooda, waxayna caawiyaan dhibanayaasha iyo markhaatiyada doorka muhiimka ah ka qaata nidaamka caddaaladda dembiyada. Qareenka degmadu wuxuu kula taliyaa dhibanayaasha xuquuqdooda sharciga ah iyo heerka kiiskooda, wuxuu bilaabaa dacwado sharci si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badqabka dadka waaweyn ee nugul oona ku sugan gudaha degmada, wuxuuna keenaa ficilo lagu helo ama lagu xoojiyo waajibaadka masruufka ilmaha.. *Aan xisbi ahayn*

Guddoomiyaha baarkinka degmada: Todobo xubnood ayay ka kooban yihiin Guddiga Gudoonka Three Rivers Park District Board of Commissioners, kuwaas oo shan ka mid ah laga soo doortay degmooyinka ku yaal agagaarka Degmada Hennepin iyo laba soo magacaabeen Guddiga Gudoonka Degmada Hennepin. Gudoonka barkinada waxay mas’uul ka yihiin helitaanka, horumarinta, iyo dayactirka baarkinada waaweyn, meelaha lagu xanaaneeyo duur-joogta, goobaha taariikhiga ah, kaymaha iyo kaydka kale, iyo siyaabaha loogu talagalay helitaanka dadweynaha ee harooyinka, webiyada, iyo durdurada iyo dhacdooyinka kale ee dabiiciga ah iyadoo ujeedku yahay dheefaha iyo Isticmaalka muwaaddiniinta ku sugan hareeraha iyo aagga caasimadda Degmada Hennepin. *Aan xisbi ahayn*

Xafiisyada magaalada

Duqa magaalada: Duqa magaalada inta badan waa madaxa fulinta magaalada (inkasta oo ay tani ku kala duwan yihiin dawlada hoose). Waxay inta badan ballamaan xafiisyada magaalada oo ay guddoomaan shirarka golaha. Duqayda magaalada inta badan waxay ku lug lahaadaan soo jeedinta miisaaniyada magaalada waxayna diidi karaan sharciyada uu soo jeediyo konsalku. *Aan xisbi ahayn*

Golaha deegaanka: Xubnaha golaha magaalada waxay caadi ahaan u adeegaan sidii “laanta” sharci-dejinta ee dawladda hoose (inkasta oo tani ay ku kala duwan yihiin dawlada hoose, maadaama ay sidoo kale yeelan karaan awoodda sharci fulinta). Xubnaha Goluhu waxay soo jeedin karaan xeerar, dejin karaan siyaasadda maamulka, waxayna u gudbin karaan miisaaniyadaha uu soo jeediyo duqa magaalada. Magacaabida duqa magaalada ee dawlada hoose waxay u baahan tahay ansixinta golaha. *Aan xisbi ahayn*

Dugsi degmeedka

Xubinta guddiga dugsi: Wuxuu sameeyaan siyaasadaha dugsi, shaqaaleysiiyaan kormeeraha guud si uu u bixiyo hogaaminta waxbarashada degmada wuxuuna dejiyaa canshuuraha lagu maal geliyo degmada. *Aan xisbi ahayn*



Waxa ku qoran warqadda
codbixinta la beddela sannad
kasta waxayna ku xiran tahay
meesha aad ku nooshahay.

Kahor inta aadan codeyn, waxaa muhiim ah inaad
cilmi baaris ku sameyso musharaxiinta iyo su'aalaha
ku saabsan warqadaada codbixinta.

mnvotes.gov/myballot



Ahaanshaha codbixiye xog ogaal ah

Waa kuwan qaar ka mid ah agabyada kaa caawinaya helida macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan musharaxiinta, xafiisyada ama su'aalaha ku saabsan warqadda codbixinta:

- Booqo mnvotes.gov si aad u hesho macluumaadka lagala xiriiro musharaxiinta, oo ay ku jiraan websaydyada musharaxiinta, iimaylada, iyo lambarrada taleefanka. Waxaad kula xiriiri kartaa musharaxiinta su'aalaha aad ka qabto arrimaha muhiimka kuu ah
- Barta mnvotes.gov waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaadka lagala xiriirka xisbiyada siyaasadeed ee waaweyn iyo kuwa yaryar ee Minnesota
- Websaydka iyo madashada baraha bulshada ee musharaxiinta
- Khudbadihii iyo doodihii musharaxiinta
- Warbixinnada saxaafadda ee laga dheehdo wargeysyada, telefishannada, iyo raadiyaha
- Diiwaanada codbixinta (*haddii musharaxa u tartamayo dib-u-doorashada*)
- Aqbalid (*taageerada dadweynaha ee musharax*)
- League of Women Voters: lwvmn.org
- Ballotpedia: Ballotpedia.org
- Xafiisyada gobolka: Booqo hennepin.us si aad dib ugu eegto ficilada guddiga degmada iyo macluumaadka kulanka
- Xafiisyada Magaalada: Booqo websaydka magaalada oo dib u eeg wixii macluumaad ah ee laga heli karo kulamadooda
- Guddiga dugsiga: Booqo websaydka degmadaada oo dib u eeg wixii macluumaad ah ee laga helayo kulamadooda
- Garsoorida: Si aad wax uga ogaato musharaxiinta garsooraha, isticmaal bogga Macluumaadka Musharaxiinta Garsoorka ee Minnesota State Bar Association msbawebtest.mnbar.org/public-resources/judicial-candidate-information



Calaamadeynta warqadaada codbixinta

Markaad hesho warqaddaada codbixinta, waa waqtigii aad buuxin lahayd.

Calaamadaynta warqadda codbixinta

Ku codee warqad qalinkuna waa habka ugu badan ee lagu codeeyo.

- Ku codee qalin oo si buuxda u buuxi goobaabinta ku xiga musharax kasta oo aad dooranaysid.





Ku calaamadaynta aaladda calaamadaynta codbixinta

- Codbixiyayaashu waxay dooran karaan inay isticmaalaan aaladda calaamadaynta codbixinta.
- Aaladda calaamadeynta warqada codbixinta waxa uu leeyahay xulashooyin badan oo si fudud loogu calaamadeyn karo warqadaada codbixinta, sida far waaweyn, tilmaamo cod ahaan laguugu akhrinayo, keyboorka indhoolaha ama shaashada taabashada. Mashiinku wuxuu daabici doonaa warqaddaada codbixinta oo calaamadeysan.

Xusuusnoow

- Codkaagu waa qarsoodi, waxaadna xaq u leedahay inuu kuu qarsoonaado
- Waxaad keensan kartaa qof kaa caawiya cod bixinta ama waxaad weydiisan kartaa caawimo garsooraha doorashada
- Haddii wax khalado, haka labalaynin inaad sarkaalka doorashada weydiiso warqad cusub



Ka qayqaado

Ka-qaybgalka dadka madaniga ahi kuma dhammaanayso doorashada! Waxaa jira siyaabo badan oo aad muwaadin ahaan qayb uga ahaan karto sanadka oo dhan. Waa kuwan siyaabo aad uga qaybqaadan karto marka laga reebo codbixinta:

- Noqo garsooraha doorasho ama garsooraha doorashada ardayda
- Ka caawi dadka kale ee bulshadaada isdiiwaan gelinta si ay u codeeyaan ayna helaan goobtooda codbixinta
- Ku biir olole doorasho
- Ogow cidda ay yihiin masuuliyiinta aad dooratay oo la xidhiidh. Waxay halkan u joogaan inay kuu adeegaan!
- Ku biir guddiyada ama gudoonka magaaladaada
- Ka qaybgal shirarka magaalada iyo gobollada
- Ka qayb qaado hawlaha ururka xaafaddaada
- Si iskaa ah ugu ula shaqee urur ama xisbi siyaasadeed qabta shaqo aad danayso
- Doorasho usoo istaag!
- Nagala soco Facebook ama Twitter @HennepinCountyElections
- La wadaag hagahan asxaabta, qoyska, iyo dadka xaafada kula degan!

Hennepin County Elections

hc.vote@hennepin.us

612-348-5151

hennepin.us/elections

